Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Fedraalka Soomaaliya
Golaha Shacabka
Hadal-qoraalka kalfadhiga Kol.3-aad
Ducomentiga Kol.3-aad/F.10-aad/2013 **06/10/2013**

Kalfadiga 3-aad
Kulankiisa 10-aad,saacadda 12:00gh-saacadda 02:30gd.
Guntinta:150
Ajendaha:

1. **Furitaanka aayadaha Qur'aanka Kariinka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Hadaljeedinta Guddoonka**
4. **Akhrinta 1-aad ee Hindise sharciyeedka Dhismaha Hayada Maareenta Masiibooyinka.**
5. **Akhrinta 1-aad Hindise Sharciyeedka horumarinta Bangiga.**

Shir-guddoomiye Guddoomiyaha Golaha shacabka Mudane Muxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari),

Waxaa shirka furay Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari,waxaana lagu furay Aayadaha qur'aanka Kariimka uuna akhriyay Xil.
Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyay in la ansixiyo ajendaha shirka weyna ansixiyeen.
Kadib Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyay qudbad dheer oo ku saabsaneyd wax ka badalka habraaca ansixinta Miisaaniyadda iyo shintiriska kalfadhiga 3-aad ee Golaha shacaka.waxaa kaloo hadaljeedintiisa ku soo qaadey .

a. Hadal-jeedinta Rai'isul/wasaaraha maalinta ay taariikhda tahay 28/10/2013
b. Daraasad iyo Dood wadaag ay ja yeelan doonaan barnaamijka uu Rai'isul/waaraha uu soo jeediyay mudo labo maalmood.
c. Soo bandhigita Miisaniyadda 2014,Wasiirka aaliyadda30/20/2013
d. Guddiyada Baarlamaanka oo midwaliba qeybta kaga aadan miisaaniyadda kala xaajoonaayo wasiirka,XIldhibaan ahaanba uga aadan is waafaqsanaanta barnaamijka qorshaha howlgalka wasaaradda iyo Miisaaaniyadda,maalmaha 2-6.11/2013,Guddi walbo waa in ay warbixintiisa gaartaa Guddiga Maaliyadda iyo qorsheynta ee Baarlamaanka ugu danbeynta maalinta 07/11/2013

e. Wada xajoodka guddiga Maaliyadda Qorsheynta ee Baarlamaanka iyo Wasaaradda Maaliyadda Qorsheynta waa in uu ku soo gabagaboobaa ugu danbey 14/11/2013
f. Guddiyadda maaliyadda waa iyo Qorsheynta ee Baarlamaanka waa in uu warbixintiisa Miisaaniyadda 2014, Golaha horkeenaa ugu danbeyn (06/11/2013),oo dood wadaaga miisaaniyadda bilaabanto.
g. Golaha shacabka waa inuu Miisaaniyadda Fedraalka ansixiyaa isla bisha Nofember gudaheed.
h. Maalmaha ka haray kalfadhiga 3-aad wuxuu Golaha ujeedsan doonaa ansixinta hindise sharciyeedyada harsan oo golaha fulinta horey usoo gudbisay
i. Hadal jeedinta Rai'isul/wasaaraha waxey ku began tahay ansixinta Miisaaniyadda, kadib waxey shacabka fursad u heli karaan in ay la socdaan lacagahii Dalka soo galay sidii loo kharshgareeyay.

- xil. Cabdi Xaashi wuxuu sheegay in shintiriska la ansixiyo si loogu dhaqmo ineysan guddiga joogtada aysan shaqeynin .

Guddoomiyaha wuxuu sheegay in qaamuuska Af Soomaaliga uu dhigaayo qofkii rabona uu halkaas ka raadsado
XIl. Maxamed IIdle Geedi oo qaaday point of order wuxuu sheegay in marka la keeno sharciga lahorgeeyo guddiga kadibna loosoo gudbiyo Baarlamaanka si uu ansixiyo.
Guddoomiyha wuxuu sheegya in guddiga madaxbanaan ee Dastuurka oo lamagacaabay in la horkeeno oo xukuumadda u soo gudbiso Baarlamaanka kadibna la ansixiyo.
Xil. Saharo waxey sheegtay arinta doorashooyinka in la dhiso larabay aan wali la dhisin iyo guddiga adeega Baarlamaanka aan wali dhasin waa in naloo cadeeyaa.
Guddoomiyaha wuxuu u sheegay in dib jawaabta la idinkaga keeni doono kadib Guddoomiyaha Ku/xigeen 1-aad ee Golaha Shacabka wuxuu u yeeray Wasiirka Arimaha Gudaha Mudane C/kariin Xuseen Guuleed, Wasiirka wuxuu ka hadlay hayadda Maareynta Misiibooyinka wuxuuna sheegay in Hey'adda la aas aasay 2011 laguna magacaabay Xeer Madax/weyne sanadka markuu ahaa 2012kuii waxaana laga reebay Miisaaniyada Qaranka. Waxeyna ka cowdeyn in loo siidaayo Miisaaniyadda waxeyna soo mariyeen golaha Wasiiradda, waxaana loo sameeyay sharci kadibna loo soo gudbiyay Golaha Baarlamaanka,wuxuu intaa ku daray in ujeedada ay udhiseyn ay tahay :- Massiibooyinka Rabaaniga,tan qaraxa iyo Abaaraha,iyo hayada yeelato keyd

qaran,in fatahaad dhacdo:- intaakadib waxaa bilaabatay su'aalihii XIldhibaanada ay weydiinaayeen wasiirka waxeyna u dhacday sida tan:

su'aal

Xil. Shuuriye : Wuxuu weydiiyay maxaa labada heyadood loo mideyn waayay oo looga dhigi waayay mid kaliya?

Xil.siciid wuxuu sheegay in hey'addan loo aas aasay barakacyaasha marka heyaddan ma waxay ka shaqeyneysaa barkacyaasha ama masiibooyinka?

Xil shaacir :wuxuu sheegay in hey'addan tahay NGO ,wuxuuna soo jeediyay in aanan la ansixinin

Jawaab

- ✓ Wasiirka wuxuu sheegay inaan la mideyn Karin labo hey'adood oo midkasta ay shaqadooda ay gaar tahay dib u dajinta ayaa aad u balaaran.
- ✓ Wuxuu sheegay iney xooga saarayaan masiibooyinka sababtoo ah dunida masiibooyinkooda waxey u haayaan dhaqaalo badan lakiin anaga dhaqaalo ma heysano.
- ✓ Wuxuu sheegay hay'addaan ineysan aheyn NGO LAAKIIN AY RABAAN IN BARAKACAAYAASHA IN WAX LOO QABTO.

SU'AAL 2-AAD

Xil. C/qadir Sii sii : wuxuu SOO JEEDIYAY IN HAY'ADDAAN LA LA xisaabtamo oo la weydiiyo sida ay wax u maareeyso iyo bobolada dhamaan waxa ay u qabtaan

xil. waxey sheegtay in masiibooyinka dadka ku dhaca ay ubadan yihiin gobolka ay ayada ka soo jeedo waxey soo jeediysay habka guddiyada la wafaajiyo lana soo de dejiyo hey'adda dib-u-dejinta si qaxootiga di loogu celiyo goobahooda ayna ugu howlgalaan xoola hooda iyo beerahooda.

XIL. Faarx cawad wuxuu sheegay in Hey'addaan ay wax badan soo qabatay wuxuuna su'aalay Wasiirka sababta loo balaarin waayay Hey'addaan loogana dhigi waayay Masiibooyinka iyo Qaxootiga.

Jawaabta Wasiirka

- ✓ Wuxuu sheegay wasiirka in Hey'adda ay ku saleysan tahay habka iyada ay u dhisan tahay .waxayna dedejiyeen Arinta Qaxootiga ,waxayna rajeynayaan in si deg deg ah loo hergeliyo.
- ✓ In Hey'adda laga dhigo labo masiibooyinka iyo Qaxootiga,waxayna utaalaa Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya .

Su'aal 3-aad

Xil.Maxamed Maxamuud Xeyd wuxuu sheegay in Hey;adda Masiibooyinka ay yeelato Xafiis ,wuxuu soo jediyaya in la dihiso wasaaradd gaar ah si loo aogaado tirada dadka Qaxootiga Gudaha iyo Dibedda.

Xil. Axmed Taw:wuxuu sheegay in Hey'addaha ay yihiin hey'add loo baahan yahay,waxaan daraasad ku sameeyeen in la helo bakhaaro waa weyn ,wuxuuna codsaday in Miisaaniyada loo helo.

Xil.Cabdiraxmaan suge:wuxuu wasiirka weydiiyay in ay ku soo lifaaqeyn Dukumintiga waxa ay ka soo shaqeeyeen? Wuxuuna sheegay in uu soo dhaweynaayo in miisaaniyad loo helo.

Xil. Cusmaan Libaax:wuxuu soo jeediyay in Barakacyaasha loodaayo Hey'adda maareynta masiibooyinka.

Jawaabta Wasiirka

1. wuxuu sheegay in loo baahan yahay keyd dowladda in la helo.markii dib udhac ay 1990 waxaa loo baxsaday keydkii Dowladdii burburtay ay heysay ,haddii ay noqoto dhainaca Gobolada ,waxaa loo baahanyahay in Budget loo helo shaqaalha ka howlgalaaya.
2. Wuxuu sheegay in miisaaniyadda ay ka rabaan Golaha Baarlamaanka.
3. Hadday xildhibaanada ay ubaahanyihiin warbixinta waxa ay qabteen ,waxay diyaar u yihiin in ay u keenaan.

Shir-guddoomiyaha Guddoomiye Ku-xigeen 1-aad Mudane Jeylaani Nuur Iikar ayaa wuxuu sheegay in shirka xiran yahay saacadda waxey eheyd 12:00gd.